GOBOLKA VERMONT

**MAXKAMADDA SARE** | **WAAXDA DANBIYADA**

**Qayb** | **Lambarka Kiiska** ____________________

**Gobolka Vermont iyo** ________________________ **Taariikhda Dhalashada:** ____________________

Cinwaanka Eedeysanaha: ________________________________________________

# KA TANAASULKA IMAANSHAHA DHEERAADKA AH IYO DALABKA QIRASHADA DANBIGA

Aniga oo ah, Eedeysanaha kor uu ku qoran yahay magiciisu, waxaa la igu qaaday dacwada danbiga____________________________________, kaas oo ka ah danbi yar sharciyada Gobolka Vermont. Waxa aan sidoo kale fahansanahay ciqaabta ugu badan ee danbigan uu yahay________________________________.

Waan fahansanahay in ciqaabta ugu yar ee waajibka ahi inay tahay: ☐ ______________________________

☐ Ku Munaasab Maaha

(Hadii dacwada danbiga wax laga badalay)

Waxa aan heley nuqulka Macluumaadka Wax Laga Badalay, oo ay ku jiraan ciqaabka ugu yar iyo ugu badan ee danbiga halkan ku qoran. Waxa aan ka tanaasulay xuquuqda dhagaysiga oo danbiga iyo ciqaabaadka waa la ii akhrin doonaa, iyo sidoo kale xuquuqaha kale ee la xidhiidha dhagaysiga noocan ah.

Waan fahansanahay in Maxkamadu ay armi karto soo celin wixii dhibane ah, hadii uu jiro.

Waxa aan fahansahay in si loo caddeeyo danbiga la igu soo oogay, Gobolku ay tahay inuu cadeeyo shayada soo socda ee daruuriga ah si bilaa shaki ah:

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

Waxaan fahansanahay in aan xaq u leeyahay inuu i matalo looyar aan anigu iska bixinayo kharashkiisa, oo hadii aanan awoodin in aan qabsado, waxaa ii qaban doona mid Gobolka oo iga bixin doona kharashka.

☐ Ima matalayo looyar oo ma doonayo inuu i matalo mid.

☐ Waxaa i matala looyar, magiciisu yahay___________________________. Waxa aan ku qanacsanahay talada iyo matalaada looyarkayga.

Waxaan fahansanahay in eedeysane ahaan kiiska danbiga in aan leeyahay xuquuqo dastuuri iyo sharci ah. Waxa aan fahansanahay in aan sii wadi karo DIIDMADA IN AAN DANBIILE AHAY ee danbiga sare, oo Gobolka ayay saaran tahay masuuliyada inuu cadeeyo in aan ahay danbiile si bilaa shaki ah. Waxa aan fahansanahay in hadii aan QIRTO ama AANAN KA DOODI KARIN IN AAN DANBIILE AHAA in aan ka tanaasulayo xuquuqaha soo socda, oo Maxkamadu ay i marin karto ciqaab lamid ah sida hadii AAN DIIDO IN AAN DANBIILE AHAY oo kale, la i maxkamadeeyo, oo ay xaakinadu igu xukumaan:

a. xaqa inay xaakino i maxkamadeeyaan;
b. xuquuqda inaad su'aalo waydiiyo wixii markhaatiyo ah ee aniga markhaatiga igu furaya;
c. xuquuqda soo bandhiga cadaymaha iyo markhaatiga la ii keeno Maxkamada aniga oo kharashkooda Gobolku bixinayo;
d. xuquuqda in aan ka aamuso wixii danbi ah ee la igu soo oogay dacwadiisa;
e. xuquuqda rafcaanka.

Wax hanjabaad ama awood sheegasho iima uu isticmaalin qof kaas oo isku dayayay inaan qirto ama in aanan ka doodin. Waxa aan ku qirtay danbiga ama aanan doodin in aanan danbiile ahay ikhtiyaarkayga, aniga oo xor ah. Wax balanqaad ah iimay samaynin cidna oo Gobolka ah marka laga tago inta ku jirta lifaaqa Wargelinta Heshiiska Qiraalka. Waxaan ogolaaday inuu jiro says waaqici ah oo qirashadayda danbiga ah, oo lagu xoojiyay qiraalka waxa keeney, oo waxa aan ogolaaday in macluumaadka soo socdaa uu yahay run:

______________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________

Waxa aan fahansanahay in hadii aan QIRTO danbiga in aan qiranayo in aan sameeyay qaybaha muhiimka ah ee danbiga(yada) ee la igu soo oogay dacwadooda. Waxa aan fahansanahay in hadii AANAN KA DOODIN IN AAN AHAY DANBIILE in aanan diidin in aan sameeyay qaybaha muhiimka ah ee dacwada la igu soo oogay. Waxa aan sidoo kale fahansanahay in hadii aan QIRTO ama AANAN KA DOODIN in aan ku xad gudbay Cinwaanka 23 ee Sharciga Vermont inay keeni karto **in la joojiyo liisankayga ama awoodayda in aan kaxaysto gaadhi gudaha Gobolka Vermont.** Waxa aan fahansanahay in, hadii aan QIRTO ama AANAN KA DOODIN ay keeni karto damiinka la iska dooni karo. Waxa aan akhriyay Wargelinta Damiinka La Iska Dooni Karo Hadii La Iskugu Xukumo ee dhanka danbe ee lifaaqa heshiiska qiraalka**.** **Waxa aan fahansanahay in, hadii aanan ahayn muwaadin Maraykan ah, in hadii aan QIRTO ama AANAN KA DOODIN ay keeni karto in la iga mastaafuriyo dalka, la ii diido dhalashada Maraykanka, ama la ii diido in aan dib usoo galo Maraykanka.**

Waxa aan halkan kaga dalbanayaa Maxkamada inay aqbasho qirashadayda ☐ DAMBIGA ☐ IN AANAN KA DOODIN DANBIGA la igu soo oogay ee kor u qoran.
Marka
aan soo gudbinayo dalabkan, waxa aan ka tanaasulay xuquuqdayda sharci ee V.R.Cr.P. 32 oo ma doonayo in aan u hadlo naftayda ama usoo bandhigo macluumaadkayga cida i xukumaysa ama inuu ii hadlo looyarkaygu. Ma jirto cid i matalaysay oo baadhay kiiskaga.

☐ Waxa aan halkan kaga dalbayaa Maxkamada inay aqbasho qiraalkayga dacwada kor ku qoran oo la igu xukumo xadiga $___________oo ah ganaax iyo kharash, oo waxa aan ogolaaday in aan bixiyo xadigan. Waxa aan fahansanahay in hadii aanan bixin xadiga oo dhamaystiran, wixii baaqi ah ee soo hadha loo gudbin doono cid uruurisa. Waxa aan ku lifaaqay $_____________oo jeeg ama dalabka lacagta la bixin doona ah oo aan u diray Maxkamada Sare ee Vermont lacagta ganaax ah ee Maxkamadu igu xukuntay, iyo sidoo kale kharashka kale ee Maxkamada ee igu waajiba

☐ Waxa aan halkan kaga dalbanayaa Maxkamada inay aqbasho qiraalkayga dacwada la igu soo oogay ee kor ku qoran oo ay sheegto Xukunkayga ________________ ilaa _______________ maalmood oo aan ku bixin doono shaqada shaqaalaha maqnaanshaha hore loo ansixiyay. Waxa aan fahansanahay in hadii aan u hogaansami waayo in aan dhamaystirto xukunkayga shaqada shaqaalaha hore loo ansixiyay inay keeni karto in aan inta ii hadhay xukunka ku dhamaystirto xabsi. Waxa aan fahansanahay in Maxkamadu ay sidoo kale ay iga qaadi doonto kharashka Maxkamada ee waajibka ah ee dacwad kasta oo aan QIRTAY ama AANAN KA DOODIN. Waxa aan ogolaaday in aan u tago Kormeerka iyo Cafinta (Probation and Parole) ugu danbayn____________ ☐ AM ☐ PM________________ si aan u balansado xukunkan.

☐ Waxa aan halkan kaga dalbanaa Maxkamada inay aqbasho qiraalkayga dacwada kor ku qoran iyo inay soo saarto Amarka Xanibaada ee xukunka lagu sheegey lifaaqa Wargelinta Heshiiska Qiraalka iyo lifaaqa Amarka Xanibaada. Waxa aan akhriyay dhamaan heerka ku munaasabka ah iyo xaalada gaarka ah ee xanibaada, iyada oo laga duulayo saxeexayga waraaqahaas, waxa aan ogolaaday shuruudaha khuseeya oo waxa aan fahansanahay in Maxkamadu ay sidoo kale ay iga qaadi doonto kharashka Maxkamada ee waajibka ah ee dacwad kasta oo aan QIRTAY ama AANAN KA DOODIN. Waxa aan fahansanahay in, mudada xanibaada, hadii aanan u hogaansamin heerka iyo xaaladaha gaarka ah ee xanibaada, in Maxkamadu ay igu xukumi karto xukun gaarsiisan xukunka hoos yimaadda xukunka lagu sheegey

lifaaqa Wargerlinta Heshiiska Qiraalka iyo lifaaqa Amarka Xanibaada. Waxa aan ogolaaday in aan u tago Kormeerka iyo Cafinta ugu danbayn____________☐AM ☐PM________________ si aan ula kulmo Sarkaalka Xanibaada.

☐ Waxa aan halkan kaga dalbanaa Maxkamda inay aqbasho qiraalkayga dacwada kor ku qoran oo ay dib u dhigto xukanka muddo dhan ______________ bilood/sanado iyo inay soo saarto Amarka Xanibaada Dib loo Dhigay ee xukunka lagu sheegey lifaaqa Wargelinta Heshiiska Qiraalka iyo lifaaqa Amarka Xanibaada oo Dib loo Dhigay. Waxa aan akhriyay dhamaan heerarka iyo shuruudaha gaarka ah ee khuseeya xaninaadaha, iyadoo laga duulayo saxeexayga waraaqahaas, waxaan ogolaaday shuruudahaas khuseeya. Waxa aan fahansanahay in, inta lagu jiro mudada xukunka dib loo dhigay, hadii aanan u hogaansamin shuruudaha heshiiskan, in Maxkamada ay igu xukumi karto xukunka ugu badan ee lagu sheegey kor iyo wixii waajibaadka ku munaasabka ah ee xukunka ugu yar iyo kharashka Maxkamada. Waxa aan ogolaaday in aan u tago Kormeerka iyo Cafinta ugu danbayn____________☐AM ☐PM______________ si aan ula kulmo Sarkaalka Xanibaada.

Waxa aan ka dalbanayaa Maxkamada inay ku aqbasho qiraalkayga qoraal maadaama tegitaanka shakhsi ahaaneed ee Maxkamada ay igu keeni karto dhibaatada soo socota:

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

**Taariikhda**

________________________________ ________________________________

**Saxeexa Eedeysaha**

________________________________ ________________________________

**Saxeexa Koriyaha Matalaya** **Saxeexa Looyarka Eedeysanaha**

*(Hadii eedeysanahu uu ka yar yahay 18 jir)*

Gobolka waxa uu ogolaaday Qiraalka Ka Tanaasulka iyo sida uu dhigayo Qaybta 5321 ee Cinwaanka 13 ee Sharciga Vermont, Gobolka Vermont waxa uu sheegey in:

☐ aanu jirin dhibane.

☐ dhibanaha(yaasha) waxaa la siiyay wargelin wakhti hore ah oo dacwada eedeysanaha ee qiraalka ah iyo xuquuqdooda inay yimaadaan oo ay si macquul ah u sheegaan aragtidooda danbiga laga hadlayo, qofka la xukumay, iyo baahida dib ugu yeedhida. Dhibanaha(yaasha) ma joogo oo ma uu sheegin aragtidiisa, taas oo ah af ama qoraal, aragtida ku saabsan xukunka ama dib u dhigidda xukunka ee lagu taliyay.

**Taariikhda**

________________________________ ________________________________

**Saxeexa Xeer Ilaaliyaha Gobolka**

**AMARKA**

☐ Waxa aan ogaaday in imaanshaha shakhsi ahaaneed ee eedeysanaha inay keeni karto dhibaato ka badan wixii faa'ido ah ee ay leedahay oo waxa aan halkan ku aqbalay qiraalka eedeysanaha ee danbiga kor ku qoran, kaas oo aan u arko mid uu ikhtiyaarkiisa u sameeyay isaga oo fahansan waxa ka dhalanaya kadib marka isaga oo og uu ka tanaasulay xuquuqdiisa dastuur. Qiraalku waxa uu salka ku hayaa caddaymo. Waxaan xukumay danbiilenimada eedeysanaha oo waxa aan soosaaray xukunka ah inuu dambiga galay.

☐ Maan aqbalin qiraalka eedeysanaha ee ka tanaasulka ee dacwada kor ku qoran.

**Taariikhda**

________________________________ ________________________________

**Saxeexa Xaakinka**